

Waa maxay Daawooyinka Difaaca Jirka ee Halka Unug?



Haddii aad khatar ugu jirto xanuunka daran ee COVID-19 lagaana helay caabuqa COVID-19 ama aad la joogtay qof laga helay caabuqa, waxaad u baahan kartaa daawada difaaca jirka ee halka unug (mAb). Waxaad u qalmi kartaa daawada mAb si lagaaga daaweeyo COVID-19 ayadoo ku xiran da'daada, taariikhda caafimaadka, iyo muddada aad qabtay astaamaha xanuunka.

Daawada mAb waxay kahor istaagaysaa fayraska keena COVID-19 inuu galo unugyada jirkaaga waxayna yaraynaysaa cadadka fayraska ku jira jidhkaaga. Tani waxay ka dhigan tahay inaad qabi karto astaamo fudud waxaana yaraan kara baahida aad u qabto in isbitaal lagu seexsho.

Daawada mAb ayaa caawin karta dadka:

- Khatarta wayn ugu jira inay qaadaan astaamaha daran ee xanuunka **iy**
- Laga helay caabuqa COVID-19 lahaana astaamaha xanuunka 7 maalmood ama ka yar **ama**
- La joogay qof dhawaan laga helay caabuqa

• WAA MAXAY DIFAACA JIRKA EE HALKA UNUG?

Jirkaaga ayaa si dabiici ah u sameeya difaacyo la dagaalama caabuqa. Hase yeeshee, jirkaaga ayaan lahaan karin difaacyo loo sameeyay inay aqoonsadaan fayraska ugub (ama cusub) sida SARS-CoV-2, oo ah fayraska keena COVID-19. Difaacyada jirka, ama mAb yada, waxaa lagu sameeyay shaybaadh si ay uga dagaalamaan caabuuq gaar ah (oo hadda ah, fayraska SARS-CoV-2) waxaana lagugu siinayaa si toos ah faleenbaha. Daawada mAb ayaa ku caawin karta haddii aad khatar wayn ugu jirto astaamaha daran ama in isbitaal lagu dhigo.

Daawada mAb ee COVID-19 way ka duwan tahay talaalka COVID-19. Talaalku wuxuu kiciyaa difaaca dabiiciga ah ee jirka bixiyo, laakiin tani waxay qaadan kartaa asbuucyo inuu soo saaro difaacyo ku filan inay la dagaalamaan fayraska. Sidaas awgeed, haddii aad qabto fayras, daawada mAb ayaa siinaysa jirkaaga difaacyada uu u baahan yahay si uu isku difaaco. Daawada mAb ma badalayso baahida loo qabo difaac laga helo talaalka laakiin waxay ku caawinaysaa haddii ay u badan tahay inaad aad ugu xanuunsato COVID-19.

• DAAWADA DIFAACA JIRKA MA IGU RIDI KARTAA XANUUN?

Daawooyinka difaaca jirka kuma jiraan wax fayras ah oo nool, marka ma jirto khatar ah inaad COVID-19 ka qaado daawada mAb. Hase yeeshee, daawada difaaca jirka ayaa keeni karta cilado. Fadlan kala hadal dhakhtarkaaga ciladaha ka dhalan karta iyo waxa aad samaynayso haddii aad ciladaha dareento.

• KAWARAN HADDII AAN U QALMI WAAYO DAAWADA DIFAACA JIRKA?

Dhakhtarkaaga ayaa go'aamin kara inaad u qalmin daawada mAb. Waxaa jiri kara sababo badan oo arintaan keeni kara. Waxaa suurtagal ah inaad buuxin dhammaan shuruudaha u qalmida, ama waxaad qabi kartaa xanuun kale oo kuu diidaaya daawada mAb. Ka codso dhakhtarkaaga dookhyada kale ee daawada.


• SIDEE AYAAN KU HELAYAA DIFAACYADA JIRKA?

Tallaabada 1 aad: Waa in lagaa helaa caabuqa COVID-19 aadna leedahay astaamaha xanuunka muddo 7 maalmood ah ama ka yar.

Tallaabada 2 aad: Waa inuu kusoo gudbiyaa dhakhtarkaagu.

Tallaabada 3 aad: Raadi xarunta daawada kugu duraysa ood tagi karto.

Si aad u hesho daawada mAb waa inuu kusoo gudbiyaa dhakhtarkaagu waana in lagugu duwaa goobaha la heli karo ee daawada kugu duraaya. **Haddii aadan haysan dhakhtar**, wac Xarunta Wicitaanka La Combat COVID Monoclonal Antibodies Call Center (dagaalanka COVID ee Daawada difaaca) ood ka helayso 1-877-332-6585 si aad u ogaato qofka aad kala hadlayso astaamaha xanuunkaaga iyo daawada.



DOH 825-031 March 2022 Somali

Si aad dukumiintigaan oo qaab kale ah u codsato, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhagoolka ah ama kuwa maqalkoodu culus yahay, fadlan waca 711 (Washington Relay) ama iimayl u dir <mailto:ecivil.rights@doh.wa.gov>.